

Waxa La Filan Karo: Hadal Qoraalka Booqashada Rugta Tallaalka ee Gawaarida Dhexdooda ah

Rugaha tallaalada ee gawaarida dhexdooda ah waxay tallaalka COVID-19 soo gaarsiiyaan adiga iyo bulshadaada. Muuqaalkan wuxuu kuu sharaxayaa wixa aad filan karto marka aad booqato rugta tallaalka ee gawaarida dhexdooda ah.

Marka aad timaado rugta gawaarida dhexdooda ah waxaad iska xaadirin doontaa soo dhaweyaha inaad balantaada tallaalka u timid.

[Soo dhaweyaha] Iska waran! Hagaag, maanta ayaan kuu xaadirin doonaa. Waa maxay magaca awoowgaaga (magaca dambe)?

Fadlan ogeysi haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad meesha gasho ama luuqaada. Rugta tallaalka ee gawaarida dhexdooda waxay had iyo jeer nafaas u helaan dadka iska yimaada ballan la'aan, marka soo wado saaxiib!

[Soo dhaweyaha] Horay ayaad u socon kartaa, safka ayaad gali kartaa.

Ku sug waqtigaaga midkood baska dibaddiisa ama mesha sugida ee baska dhexdiisa.

Marka la gaaro waqtigaaga aad tallaalka qaadan lahayd, la fariiso dhakhtarka miiska tallaalka. Waxaa jira daah laguu furi karo haddii aad u baahan tahay aasturnaan.

[Dhakhtarka] Ma ii sheegi kartaa magacaaga?

Dhakhtarka wuxuu kula eegi doonaa macluumaadkaaga waxaadna weydiin kartaa su'aal kasta oo aad qabto oo ku saabsan tallaalka.

Dhakhtarka wuxuu u baahan doonaa inaad u baneyso garabkaaga si uu tallaalka kaaga siiyo.

Kadib marki lagu tallaalo, waxaad ka bixi doontaa baska.

[Shaqaalah] Haye. Waad ku mahadsan tahay inaad maanta timid. Waad ku mahadsan tahay inaad tallaalka qaadatay. Haddadan waxaan kaa rabnaa inaad halkan fariisatid oo aad u sugtid ilaa iyo 15 daqiqiyo.

Waxaad fariisan doontaa goobta indha-indhaynta ilaa iyo 15 daqiqiyo. Kadibna shaqaalahay ayaa kuu sharixi doona waxa ay tahay inaad sameyso haddii aadan fiicnayn. Shaqaalahay tabbabaran sida kalkaalisooyinka ama dhakhaatiirta caafimaadka gurmadka degdeggaa ah ayaa goobta jooga haddii aadan fiicnayn.

Marka ay 15-kaaga daqiqiyo kuu dhamaadaan, wax kaste way kuu dhamaadeen!

Waad ku mahadsan tahay inaad tallaalka qaadatay.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan tallaalka COVID-19, la hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama soo booqo boggeena intarnetka. <https://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/vaccine/index.html>

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

6/17/21 (Somali)

Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac: 651-201-4989